



Qaadida Dacwooyinka Khatalida Cayrta ah

Welfare Fraud Hearings


Waa maxay qaadida dacwadaha maamul mamnuucu (ADH)?

Khatalida macnaheedu waa been ka sheegida ama qarinta akhbaar si loo helo manfac dowladeed. Waxaana ku jira isku dayga gadida manfaca SNAP ka ama kaarka cayrta ee EBT ga. Ku gadashada ama isku day ku gadasho sigaar ama khamri ee kaarka EBT waa khaa'nimo iyana.

Hadii ay dowladu is tiraa saa ayaad sameysay, waa ay ku maxkamadayn kartaa, iyo/ama waxaa dhici karta in ay qabtaan kulan lagaaga mamnuucayo cayrta (ADH). ADH waa kulan lagu go'aansanayo in aad sameysay khatalaad madani ah si aad u hesho manfacyada [MFIP, DWP, Childcare, General Assistance (GA), Group Residential Housing (GRH), Minnesota Supplemental Aid (MSA), Medical Assistance, MinnesotaCare, SNAP (food support) iyo Emergency Assistance].

Maxay dowladu u baahan tahay in cadeeyso?

kulankaa la yiraa ADH, dowladu waa khasab in ay si cad oo aan shaki ku jirin ay cadeeyso khaa'imaadi in ay dhacday. Taa macnaheedu waa in ay cadeeyaan in aad u sameysay ama aad u tiri **si kas ah** waxaan jirin si aad dowlada uga hesho wax aadan xaq u lahaateen in aad hesho.



Ka waran hadii xaakim ADH ku uu xukumo khaa'inimo in aan sameeyey?

Kiisaska intooda badan, marka ugu horeeysa oo taasi dhacdo waxaa lagu diidayaa inaad hesho manfacyadaa 1 sanno, marka labaad ee aad taa sameeyso, 2 sanno ayaa lagu diidi manfacyada, mar sedexaad waligaaba waa lagaa mamnuuci inaad manfacyadaa qaadato. Hadii lagaa mamnuuco MFIP, waxaa kaloo lagu diidi iyana SNAP. Hadii xaakimku xukumo inaad manfacyada SNAP ka qaadatay in ka badan 1 gobol isku mar, waxaa lagu diidi kartaa manfaca SNAP ka 10 sanno. Xabsi uma aadi kartid ADH awgeed, laakiin wax kasta oo aad tiraahdo ama wax kasta oo hay'ada ADH soo ogaato adiga ayaa baxar lagugu galin karaa hadii ay go'aansadaan in ay ku maxkamadeeyaan.

Ma ka tanaasulaa in dacwada la aqqdo?

Dowladu waxay ku waydiisan in aad u saxiixdo foom si aad u tiraa ma doonayso dacwada in la dhageeyso. **Wac xafiiska gargaarka dhanka sharciyada (Legal Aid) si ay talo kuu siiyaan inta aadan waxba saxiixin!** Hadii aad saxiixdo, waxa aad fara ka qaadaysaa xaquuqdaadii ahayd in dacwadaada la qaado. Waxaad kaloo lagu diidi karaa manfacyada xataa hadii aadan qiran in aad sameysay waxa dowladu tiri wada sameysay. Hadii foomka aad saxiixdo, waxaad haysataa 30 cisho oo aad uga noqon karto kolkaa la xiriir xafiiska (Legal Aid) ka hadii aad su'aal qabto.

Kolkaa wali ma i Maxkamadeyn karaan?

Haa. Dowladu labadana way sameyn kartaa oo waa ku maxkamadeyn kartaa ama waxa ay u gudbin kartaa hawshaada hay'ada ADH. **Wax walba** oo aad u sheegto dowlada adigaa ha dhow baxar lagugu galin karaa oo dib laguugu isticmaali karaa. Haddii aad hadal oraah ku tiraa ama aad warqad saxiixdo, waxaa dhici karta in aad ka tanaasulayso xaquuqdaadii ha dhow kolka maxkamada aad saaran tahay aad ku isticmaali kari lahayd qodobka 5 aad ee dastuurka (5th Amendment). Qodobka 5aad (5th Amendment) waa xaquuqda uu muwaadinku uu leeyahay in uusan naftiisa ku muducin kolka uu maxkamad dambi saaran yahay. Waxaad u baahan tahay in aad la hadasho qareen si aad u hesho akhbaar dheeraad oo arrintan ku saabsan.

Ka waran haddii aan racfaan ka qaato ogaysiis ah in manfacayga la iga joojinayo ama la iga yareynayo?

Racfaanka waxaa lagu dari karaa dhageysiga dacwada ADH ah ee khaa'inimada la xiriirta.

Markiiba isku day inaad hesho gargaar dhanka sharciyada ah.

Dhagaysiga dacwooyinka caynkaan ahi waa kuwa khatal leh, waayo waxa dowladu in ay cadeeyso laga rabaa waa ay ka duwan yihiin jarida manfacyada loo jaro kahatalaada awgood. Dowladu waxa ay u baahan tahay uun in ay cadeeyso in cadeymaha intooda badani inay dhinacooda yihiin si ay u jarto ama u yareeyso manfacyada. Laakiin, marka ay cadeynayaan khatalaad waxa ay u baahan yihiin inay cadeeyaan khatalaad cad in ay dhacday.

Ka waran haddii ay go'aansadaan in ay I maxkamadeeyaan?

Kolkaa waa in aad waydiisato inay kaa dhaafaan ama dib u dhigaan dhageysiga dacwada ADH.



Ka waran haddii la iga helo inaan khatalaad sameeyey ama haddii la i galiyo barnaamijka weecinta la yiraa?

Haddii lagugu heli dambi ah masuqmaasuq oo ku saabsan cayrta, waa lagu diidi manfacyada. Sidoo kale, waxaa lagu diri karaa xabsi ama waxaa lagu xukumi karaa ganaax. Waxaa lagu diidi manfacyada 1 sanno, marka labaad ee aad taa sameeyso sanno ayaa lagu diidi 2 sanno manfacyadaa, mar sedexaad waligaaba waa lagaa mamnuuci inaad manfacyadaa qaadato. Arrintan waa run xataa haddii lagu geliyo barnaamijka la yiraa weecinta ama maxkamadu amarto in aan lagu qaadani dambiga lagu helay ama lagu galiyo xabsi dowlo.

Ka Waran haddii aanan ahayn muwaadin (citizen) U.S. ah?

Haddii aadan ahayn muwaadin Mareykani ah (U.S.) sida ugu dhaqsaha badan ula tasho qareen. Arrintan kore waxa ay saameyn kartaa sharcigaaga wadanka (immigration) aad ku joogto.

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2019 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixii aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**